

Khibradda Dib-u-dejinta Khadeja:

Khadeja waxay ka timid Dara'a, Suuriya waxaana iyada iyo ninkeeda iyo saddex carruur la dejiyay North Devon 2017ka. Khadeja waxay dugsiga si kooban u baratay taariikhda UK waxayna ogaatay in uu yahay waddan horumaray oo leh qiyamka asaasiga ah ee sayniska iyo bini'aadamnimada. Waxay wax ka maqashay wax ku saabsan Jaamacadda Oxford waxayna ku riyoon jirtay in ay maalin uun wax ka barato halkaas. Iskuulka, waxay baratay xoogaa af Ingiriis ah, si kastaba ha ahaatee, waxay ku baratay lahjad Maraykan ah oo ay ku adkaysatay, xitaa saddex sano ka dib iyado degan Ingiriiska waxay xustay farqiga u dhaxeeya tom-ay-to iyo tom-ah-to.

Habka dib u dejinta

Horraantii 2017, Khadeja iyo ninkeeda waxa soo wacay UNHCR iyaga oo waydiinaya in ay diyaar u yihiin in waraysi dib-u-dejinta UK lala yeesho. Waxay ahayd in ay isla wakhtigaas go'aan ka gaadhaan haddii ay oggolaanayaan geeddi-socodka dib-u-dejinta. Nolosha Urdun, halkaas oo ay magangelyo ka doonanayeen, ayaa ahayd mid hubaal la'aan ah oo adag markaa way ogolaadeen.

Khadeja iyo ninkeeda ayaa lix saacadood ku qaataw waraysiyada UNHCR. Shaqaalaha kiiska ayaa waydiiyay faahfaahin kasta oo noloshooda ah - dugsiga ay aadeen, halka ay walaalahood ku nool yihiin, wax kasta oo ku dhacay Suuriya gudaheed iyo xitaa faahfaahin yar oo ku saabsan tababarka milatari ee khasabka ah ee ninkeeda.

U diyaargarowgi safarka

Markii ay ogaatay in qoyskeeda loo aqbalay in ay u degaan UK, waxay waqtii ku bixisay in ay Google kabaadho macluumaad kala duwan, ka hor intii aanay dhoofin, iyada iyo saygeeduba waxay ka qayb qaadan jireen fasalo wacyi-gelin oo ay la qaadan jireen IOM. Fasalnadooda waxa ay ku barteen farqiga u dhaxeeya dib-u-dajinta dowladda hoose iyo kafaala qaadashada bulshada.

Markii ay Khadeja iyo ninkeeda ogaadeen in la dejin doono Waqooyiga Devon, isla markiiba waxay googleka ka baadhen magaca tuuladooda cusub. Iyada iyo ninkeeda waxay cilmi baadhis ku samayeen dhinac kasta oo degaanka ka mid ah, laga soo bilaabo isku xidhka gaadiidka iyo dukaamada ku yaala deegaanka. Markii ay ugu dambeyntii soo gaadheen tuulada, waxay horey u yaqiineen in ay u soo maraan wadad kasta kadib markay saacado ku qaateen Google Street View. Waxay

xitaa aragti ka bixiyeen in dhirta beerta ku jirtaa ay ka duwanaayeen waxa aad ku arki jireen Google Earth, taas oo ka yaabisay kafaala-hayaashooda.

Is barbardhiga waxay filanayeen iyo xaqiiqda

Degitaamka Devon waxay ahayd mid ka sahlan sidii Khadeja filaysay. Ka hor intii aanay imaanin, waxay ka walwalsanayd inay wax kasta ay dadka kale uga baahato in uga caawiyaan, laakiin iyada iyo qoyskeedaba waxaa u suurtagashay inaysi deg deg ah madax-banaani helaan. Iyadoo og in qoyskeedu uu ku noolaan doono tuulada ay ku noolaan doonaan oo ay aad u yartahay kala duwanaanshaha, waxay sidoo kale ka walwalsanayd inay xirato xijaabkeeda, hase yeesh ee waxay la kulantay tuulada j uu soo dhaweyn iyo saaxiibtinimola ka timid dadka tuulada degan. Dhab ahaantii, waxaa jira faa'iidooyin ku jira nolosha bulsho kooban – dadka ayaad sifiican isu baranesaan, deriskana waad la xidhiidheysa.

Ugu dambayntii, Khadeja waxay aqbashay in dib-u-dejintu ay ahayd mid adag, in ay ka fogaato qoyskeeda oo dhaqan ka duwan ay tahay la qabsasho u bahan, laakiin wanaagga ayaa mar walba ka miisaan roon xumaanta. Iyadoo soo martay colaadaha Suuriya iyo qaxootinimada dalka Urdun, markii dib udejinta lagu sameeyay waxay noqotay markii ugu horaaysay ay nafisto muddo sannado ka dib. Waxay awood u yeelatay in ay ka soo gudubto waahihi adkaa iyada oo sameysatay yoolal oo ay diiradda saarto dhammaan xaaladda wanaagsan ee ay qoyskeeda kala kulmaan bulshadooda cusub.

Kala duwanaanshaha dhaqanka

Iyado ay sadex sanodood ay UK degantahay, waxaa ay Khadeja weli u muuqda wax ka qosliya xaga kala duwanaanshaha dhaqan ee u dhixeeya UK iyo Suuriya. Tusaale ahaan, qof kasta Devon wuxuu leeyahay ey oo ah eeyaha waaweyn! Way isku ka dhejinayan mar aad xeebta joogtiid oo ay cabsi gelinayaan. Suuriya, eeyda beerta baa lagu hayaa, oo ma ahan kuwo qoyska ka mid ah sida kuwa halkan jooga. Waxay kaloo u aragtaa in qof kastaa uu leeyahay jadwal oo buuxa. Haddii aad rabto in aad qof shah la shaahaysid, waxaad u baahan tahay in aad qorsheyso maalmahan ama xataa toddobaadyo ka hor, halka Bariga Dhexe aad iska dul dhici kartid sida ay sameen jirtay.

Guud ahaan, Khadeja waxay qiimeynayaa ka duwanaasho ah oo muhiim ah, gaar ahaan kala dambeeysta UK. Wax walba waxaa loo abaabulay shuruuc cad, taas oo fududeyneysa in la ogaado sida ay nidaamku uu shaqeeyo – inkastoo tani ay dhici karto inay sababto dib u dhac!